

Wargeyska Mountain View

Febraayo 17, 2016

Qamiis, Febraayo 25.....Guddiga Bulshada Dugsiga, 3:30 p.m.

Fariinta Agaasimaha

Guddiga Waxbarashada Dugsiga Dagmada Salt Lake City wuxuu xubnaha bulshada ku casumay in ay fikradahooda ka dhiibtaan xulashada maamulaha xiga, iyaga oo adeegsada internetka ama yimaada qof ahaan inta ay socdaan taxanaha shirarka bulshada. Waxaa jiri doono afar fursado oo loola kulmo la-talliyayaasha raadinta si wax looga ogaado hawsha iyo waqtiga, si jawaab loogu helo su'aalaha, iyo si loo bixiyo faalo la qori doono lana gaarsiin doono guddiga. Shirarka waxay u dhici doonaan sida soo socoto:

Taariikhda iyo waqtiga	Goobta
Talaado, Febraayo 16 6:30 – 7:30 p.m.	Maktabka Dugsiga Sare West 241 North 300 West
Arbaco, Febraayo 17 6:30 – 7:30 p.m.	Maktabka Dugsiga Dhexe Highland 2166 South 1700 East
Qamiis, Febraayo 18, 6:30 – 7:30 p.m.	Maktabka Dugsiga Sare East 840 South 1300 East
Qamiis, Febraayo 18, 6:30 – 7:30 p.m.	Maktabka Dugsiga Dhexe Glendale 1430 West Andrew Ave.

Intaas kaddib, dadweynaha waxaa lagu soo dhaweynaa in ay warcelintooda ku soo gudbiyaan wareysiga ku saleysan internetka ee ku saabsan sifooyinka loo baahan yahay in Maamulaha cusub leeyahay. Wareysiga waxaa laga heli karaa <http://www.surveygizmo.com/s3/2559399/Salt-Lake-City-School-District-Superintendent-Survey>. Wareysiga waxaa kaloo lagu heli karaa luqado kale. Meelaha lagala xariiro waxaa lagu soo dhajin doonaa <http://www.slcschools.org/departments/communications/newsroom/2015-16/community-input.php> sida ugu dhakhsiyaha badan kaddib marka la dhamaystiro tarjamada.

Wareysiga waxaa la heli karaa ilaa Febraayo 26, 2016. Si aad u heshid macluumaad badan, la xariir, Search Consultant, 702-280-1006 ama jhager@atlanticresearchpartners.org